

GARGAAR CAAFIMAAD

Marka aad ku noolayn xarunta qaabilaadda

Haddii, magangelyo-doone ahaan, aad ugu noolayn xarunta qaabilaada (aadan joogin), waxaad heli kartaa gargaar caafimaad. Fedasil ayaa bixin doonta kharashka caafimaadka.



Waa maxay gargaar caafimaad?

- Booqo dhakhtar ama dhakhtar ilko
- Baaritaanka caafimaad ee codsiga dhakhtar
- Daawooyinka dhakhtarka qoray (farmashiistaha)
- Booqashooyinka kale ee caafimadka



Sidee u weydiisanaysa gargaar caafimaad?

1. Dhowr maalmood kahor booqashadaada dhakhtar, isbitaalka ama farmashiistaha, adiga (ama dhakhtar kaaga) waa inaad u soo gudbisaan codsi Qaybta Kharashka Caafimaadka ee Fedasil iyada oo loo marinayo [foomka onlaynka](http://foomka.onlaynka). (Ingiriis, Faransiiska ama Af-Holand).



Waa maxay macluumaadka aad u baahan aad ku buuxiso?

- Magaca oo sadexan
- Taariikhda dhalashada
- Lambarka-OV ama lambarka qaranka (lambarada waxay ku dull qoran yihiin dukumentiga xafiiska socdaalka)
- Magaca dhakhtarka/isbitaalka/farmashiye iyo daawada dhakhtarka qoray
- Ciiwaanka iimaylka
- Lambarka telefoonka
- Taariikhda ballantaada

2. Weydii qof ama uruur ikhtiyaarka si uu kaga caawiyo adiga haddii aadan fahmin Ingiriiska, Faransiiska ama Af-Holland ama haddii aadan heysanin internet-ka.
3. Fedasil ayaa baari doonaa haddii kharashka la bixin doono iyo haddii kale.
4. Haddii Fedasil ay oggolaato inay bixiso kharashka caafimaadka, waxaad heli doontaa dukumentiyada dhaho **dalbasha**.
5. Qaado dalbashada dukumentiga marka aad booqanayso dhakhtar, isbitaal ama faramshiyaha.
6. Kadib booqashaada Fedasil ayaa bixinta doonta kharashka caafimaad.

Macluumaad dheeraad ah miyaad dooneysaa?

Qaybta Kharashka Caafimaadka ee Fedasil

Waxaa laga helaya telefoonka gacanta Isniinta ilaa Jimcaha, 9 subaxnimo ilaa 12 duhurnimo.

02/213 43 00 (NL)

02/213 43 25 (FR)

email: medic@fedasil.be

Macluumaad loogu talo galay magangala doonyaasha Biljim

www.fedasilinfo.be

www.asyluminbelgium.be